



DISCOVER
ITS BEAUTY

Qaybta 7aad

# RASUULKII UGU DAMBEEYAY

DR. NAJI IBRAHIM



# Rasuulkii Ugu Dambeeyay

Muxammad (Naxariista iyo nabadgelyada Alle korkiisa ha ahaatee), wiilkii Cabdullaahi, wuxuu ku dhashay magaalada Makka qiyaastii 570 Ciise Dabadii (CE). Waxaa dadkiisu u yaqaaneen Al-amiin (kii ammaanada badnaa).

Markii Muxammad uu gaadhay da'da afartan, Malakul Jibriil ayaa u yimi oo soo gaadhsiiyay waxyiga. Markii hore, Nabi Muxammad waxaa la armay inuu Diinta Islaamka ugu yeedho xubnaha qoyskiisa dhow sida xaaskiisii Khadiija; ugu dambeyntiina, waxaa waxyi lagu amray inuu farriinta Alle gaadhsiiyo dhammaan Bani Aadamka. Intii noloshiisa ka hadhsanayd, farriintaan ayuu dadka kale sii gaadhsiinaayay, wuxuuna u ahaa Aadamaha tusaale fiican iyo ku-dayasho wanaagsan. Sannadkii 632, ayuu Nebi Muxammad dhintay isagoo jira lixdan iyo seddex sannadood.

Nebi Muxammad (Naxariista iyo nabadgalyada Alle korkiisa ha ahaatee) waxa loogu wacaa "Khaatimkii/kii u dambeeyay Anbiyada." Maadaama uu yahay Nebigii Anbiyada u dambeeyay, waxaa loo soo diray si uu u xaqiijiyo dhammaan waxyigii isaga ka horreeyay, oo uu ku jiro kitaabka Injiil ee Nebi Ciise lagu soo dejiyay.

Qur'aanka Kariimka ah wuxuu caddaynayaa in ***"Muxammad yahay Rasuulkii Alle iyo kii u dambeeyay Anbiyada."*** (33:40)

Si uu u xaqiijiyo xiriirka isaga iyo nebi Ciise ka dhexeeya, Nebi Muxammad wuxuu yidhi "haddii qof rumeeyo Nebi Ciise oo dabadeed anna i rumeeyo, wuxuu helayaa laba ajar." Wuxuu sidoo



kale sheegay, "Aniga ayaa dadka oo dhan uga dhow Ciise, Ina Maryama, sababtoo ah muu jirin Nebi noo dhexeeyay aniga iyo isaga."

Xaqiiqatan, Nebi Muxammad wuu sharfay oo ciseeyay Nebi Ciise. Qaybaha dambe ee buug-yarahan, waxaan kaga hadli doonaa inuu Nebi Ciise Baybalka ku sii sheegay inuu soo bixi doono Nebi Muxammad oo uu (Nebi Muxammad) sharfi doono oo waynayn doono Nebi Ciise. Intaas waxaa dheer, iyagoo sharfaya, doono Muslimiintu waxay wiilashooda u bixiyaan Ciise (magaca Carabida ee Ciise).





# Nebi Muxammad wuxuu lahaa shaqsiyad cajiiba

Nebi Muxammad – laga soo bilaabo xilligii carruurnimada iyo dhalinyaronimadiisi illaa iyo sannadihiisii Nebinimada, illaa iyo dhimashadiisii waxaa taariikh-yahanada caddaalad-soora qireen inuu ahaa shaqsiyad khaas ah, oo sharaf iyo dhaqan fiican leh. Wuxuu ahaa mid naxariis badan, daacad ah, kala furan, oo is-dhuldhig badan. Keliya kelmad kasta oo uu si furan dadwaynaha ula wadaagay lama kaydin ee xitaa noloshiisa gaarka ah si sugan ayaa loo qoray oo loo ilaaliyay illaa maalinta aan maanta joogno.

Wuxuuna ahaa Nebi, Rasuul, iyo macalin diimeed, bulsho toosiye, hage dhaqan, hogaamiye, masuul qaran, saaxiib daacad ah, saaxiib cajiib ah, sey xaasaskiisa u gaar ah, iyo Aabbe jacayl badan.

Buug-yarihiisa, Muxammad: Rasuulka Islaamka, Barofasoor Ramkrishna Rao wuxuu ku tilmaamay Nebiga "tusaalaha ugu fiican ee nolosha Aadamaha," isagoo leh: Shaqsiydda Muxammad, aad bay u adag tahay in xaqiiqdeeda oo isku dhan hadal lagu soo koobo. Keliya wax yar oo ka mid ah ayaan milicsan karnaa. Muxuu sawirro cajiib ah oo isku xigxiga ka bixiyay! Waa Muxammad, waana Nebi. Waa Muxammad, Dagaalyahan ah; Muxammad, Ganacsade ah; Muxammad, Masuul qaran ah; Muxammad, Aftahan ah; Muxammad, bulsho qaabeeye ah, Muxammad, Ilaaliyaha Agoonta; Muxammad, Ilaaliyaha Addoomaha, Muxammad, Xorriyad-siiyaha Dumarka; Muxammad, Garsooraha ah, Muxammad, Waliga ahaa. Dhammaan doorarka la yaabka leh ee u ciyaaray, ee ku kala jira waaxyaha kala duwan ee hawlaha Aadamaha, wuxuu ka yahay halyey. (p. 20)



Taariikh ahaan, muddo gaaban oo qiyaastii 23 sannadood ah oo uu Nebi ahaa, wuxuu gebi ahaanba beddelay Jasiiradda Carabta...

- wuxuu ka soo beddelay gaalnimo iyo sanam caabudis una jiheeyay inay caabudaan Hal Ilaah...
- wuxuu ka soo beddelay koox qabiilooyina kana dhigay kuwa midaysan oo wada jira...
- wuxuu ka soo beddelay cabtooynimo iyo hawo raacnimo kana dhigay dad taqwo leh oo naftooda xakameeya...
- wuxuu ka soo beddelay qas iyo sharci la'aan wuxuna ka dhigay dad hogaansan oo anshax leh...
- wuxuu ka keenay bilaa dhaqan iyo qiyam la'aan soona gaadhsiiyay heerka dhaqanka iyo sharafta ee ugu sarreeya.

Taariikhda Aadamaha marnaba laguma sheegin isbeddel bulsho oo sidaas u dhammeystiran – ka hor iyo ka dib – dhacdadaas keliya qaadatay muddo waxyar ka badan 20 sannadood.






Inkastoo ay ka baxsan tahay ujeedka buuggan in la taxo dhammaan kutubtii diimaha hore ee sii saadaaliyay soo bixitaan Nebi Muxammad, waxaan jeclaan lahaa inaan xuso in dhowr culimada Islaamka ahi saadaalintaas ka heleen kutubta Kiristaanka, Yuhuudda, Hinduuga, iyo Buudhistiga.

Xaqiiqatan, sida Nebi Muxammad loogu xusay kutubta kale waa mawduuc aad u xiiso badan oo si wayn loogaga sheekeeyay buugaag, maqaallo, iyo websaydyo badan. Hase ahaatee, qaybtan, waxaan xusi doonaa buugaag iyo qoraallo la xiriira Baybalka; kuwaas oo khuseeya sida Baybalku u sii saadaaliyay soo bixitaanka Nebi Muxammad.

Buugiisa la yaabka leh, ee Muxammad iyo Baybalka, Barafasoor Abdul Axad Dawud (horey loogu yaqaanay David Benjamin) wuxuu xusayaa in Baybalku sii sheegay soo bixitaanka Nebi 'la mid ah' Muuse:

Kelmadahan soo socda waxay ku qoran yihiin Buugga Deuteronomy, cutubka 18, faqradda 18: "Rasuul ayaan uga soo dhex saari doonaa walaalahood, kaas oo sidaada oo kale aan u sii dhiibi doono ereyadayda." Haddii kelmadahaas aan Muxammad loola jeedin, waxay ka dhigan tahay in aanay weli dhaqan gelin. Nebi Ciise marnaba ma sheegin inuu yahay Rasuulka lagu xusay kitaabka kore... Ciise, wuxuu sida Kaniisadiisuba aaminsan tahay, u soo bixi doonaa Garsoore ahaan ee uma muuqan doono Sharci-dejiye ahaan; laakiin ma aha xaakimka la sii sheegay ee iman doona isagoo ***"Xukunkii Adkaa" gacantiisa midig ku wata."*** (Deut. 33:2)

Culimada Islaamku waxay ku adkaysanayaan in Nebiga lagu sii saadaaliyay kutubtan aanu cid kale ahayn ee Muxammad yahay



sababtoo ah Nebi Muxammad iyo Nebi Muuse siyaabo badan bay isu shabbahaan. Magacyadoodu waxay ku bilaabmaan xarfo isku mid ah; waa iskaga mid dhanka dhalashada caadiga ah, guurka, waxyiga loo soo dhiibay, inay si caadi ah u dhinteen, labadooduba waxay ahaayeen Nebiyo, xaakimo, hogaamiyayaal, iyo masuullo qaran; iyo in labadooduba la yimaadeen "aayad xukun". Dhinaca kale, Nebi Ciise kalamuu mid ahayn Nebi Muuse dhanka dhalashada, doorka, iyo gebogebada; Nebi Ciise muu guursan, mana uu maamulin dadkiisa mana uu gelin wax dagaalo ah sida Muuse oo kale.

Waxa xusid mudan in kelmada ***"Rasuul walaalahooda ka soo dhex baxaya"*** ay ka dhigan tahay Rasuul ka soo bixi doona walaalaha reer Bani Israa'iil (haddii si kale loo dhoho Ismaaciiliyiinta, oo Carabta ah), ee aanay la macno ahayn Israa'iiliyiinta laftooda. Intaas waxa dheer, Kitaabka Injiil ee Baybalka, Nebi Ciise wuxuu sii sheegay inuu iman doono Hage kale, ***"oo wuxuu idin siin doonaa Hage kale"*** (John 14:16).

**Nebi Ciise sidoo kale wuxuu yidhi:**

***"Si kastaba ha ahaatee waa inaan runta idiin sheego; Way idiin fiican tahay inaan idinka tago: Sababtoo ah haddii aan tegi waayo, Hagaha idiin ma iman doono; laakiin haddii aan tago, waan idiin soo diri doonaa. Oo marka uu yimaado, dembigiina ayuu idin qirsiin doonaa, saxnaanta ayuu idin tusi doonaa, xukunkana wuu ridi doonaa... Waxaan hayaa waxbadan oo aan idiin sheegi lahaa, laakiin ma wada meelayn kartaan. Hase ahaatee, marka Runtu timaado, wuxuu idinku hagi doonaa xaqiiqda oo dhan: sababtoo ah naftiisa kama hadlayo; laakiin wax kasta oo xaq ah oo loo soo dhiibo ayuu idiin sheegi doonaa: wuxuna idin tusi doonaa waxyaabaha soo socda. Waa mid aniga i sharfi doona oo i cisayn doona..."***
(John 16:7-14)



# Waa kuma 'Hagahan kale'?

Culimada Muslimiintu waxay sheegeen in Nebi Muxammad si buuxda u buuxiyay saadaashaas Nebi Ciise, sababo badan dartood. Aynu qaar ka xusno:

- Markuu Nebi Ciise leeyahay **"Hage kale"** suurtagal maaha inuu u jeedo Ruuxda Quduuska ah. (Guud ahaan, Kiristaanku waxay rumaysan yihiin in Ilaahay ka kooban yahay saddexley kala ah Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Wiilka ah, iyo Ruuxda Quduuska ah). Sida ku xusan Baybalka, Ruuxda Qudduuska way ka horraysay muddadii jiritaanka Ciise, iyadoo loo jeedo in Haguhu [Ciise] ka dib imanayo.
- Nebi Muxammad waxaa loo soo diray inuu dadka uga digo dunuubta oo ku hago dariiqa toosan iyo saxnaanta. Wuxuu ahaa xaakim iyo garsoore, **"sharciga" ku haysta "gacantiisa midig"**.
- Nebi Muxammad wuxuu dadwaynaha ku hagay runta dhabta ah ee khusaysa Halka Ilaah ee dhabta ah, ujeedada noloshan, Aakhiro iyo nolosha kama dambeysta ah, iyo xaqiiqooyin kale oo badan.
- Nebi Muxammad wuxuu inooga warramay waxyaabaha soo socda, isagoo inoo soo dhexmariyay waxyiga iyo mucjisooyinka tirada badan ee Ilaaha Kelida ah ee soo diray, Allaah, uu siiyay. Nebi Muxammad wuxuu ahaa Rasuul aan ***"aan iskii isaga hadlin; balse waxyigii loo soo dhiibay, sheega"*** (John 16:13). Wuxuu ahaa farriin-side uu Alle Kalaamkiisa, Qur'aanka Sharafta leh inoogu soo dhiibay, kaas oo uu inoo akhriyay isagoo ku bilaabay magaca Alle. Baybalku wuxuu sii sheegay ***"Inuu hadli doono isagoo ku bilaabaya Magacayga..."*** (Deut. 18:19).

Xaqiiqatan, suuradaha Qur'aanka Kariimka ah waxay ku bilaabmaan kelmadda **{Waxaan ku Bilaabayaa Magaca Ilaahay}**.


رسول الله
محمد

Qur'aanka Sharafta badan wuxuu ina leeyahay:

**"Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista Wuxuu ku dhaartay (Alle) xiddiggu markuu hoobto, Ee saaxiibkiin [Muxammad] ma dhumin, xaqana kama leexan, Kumana hadlo hawadiisa [wax naftiisa] uu ka keenay. Quraankuna waxaan waxyi Alle ahayn ma aha."** (53: 1-4)

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

وَٱلنَّجْمِ إِذَا هَوَىٰ ﴿١﴾ مَا ضَلَّ صَاحِبُكُمْ وَمَا غَوَىٰ ﴿٢﴾ وَمَا يَنطِقُ
عَنِ ٱلْهَوَىٰٓ ﴿٣﴾ إِنْ هُوَ إِلَّا وَحْىٌ يُوحَىٰ ﴿٤﴾

Dhinaca kale, markii Yuhuuddu waydiisay John the Baptist cidda uu yahay, wuu diiday inuu **"Rasuulkaas" yahay**.

***"Ma tahay Rasuulkaas? Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Maya".*** (John 1:19-21)

**Marka waa kuma "Rasuulkaasi"?**

"Rasuulkaasi" xaqiiqatan loolama jeedo Nebi Yaxye, mana aha Nebi Ciise, sida Nebi Yaxye laftiisuba ka marag-furay.

Marka halkan la joogo, qofka caqli leh, ee si dhab ah, oo daacadnimo leh u raadinaya xaqa wuxuu is waydiinayaa:

Waa kuma **'Rasuulkaasi'** soo baxay Yahye iyo Ciise ka dib, kaas oo uu gudbinayay farriinta Allaha Kelida ah ee Runta ah ee ku amrayay dadka inay caabudaan Isaga (Alle) oo keliya?

## Waa Nebi Muxammad!

PASTEUR · NEWTON · EDISON · LAVOISIE

FARADAY · BECQUERE

PIZARRO · CONFUCIU

# THE 100

## A RANKING OF THE MOST INFLUENTIAL PERSONS IN HISTORY

**Michael H. Hart**

MAO TSE-TUNG · MARX · MARCONI

BOLIVAR · MICHELANGELO · POPE URBAN

ARISTOTLE · PETER THE GREAT · NAPOL

PICASSO · MALTHUS · JEFFE

GENGHIS KHAN · MOSES

# Qaybo Yar oo Qoraaladaasi Ka Yidhaahdeen Nebi Muxammad

Qoraalo aad u badan ayaa laga qoray Nebi Muxammad (Naxariista iyo nabadgelyada Alle korkiisa ha ahaatee).


Hoos waxaa ku qoran oraahyo kookooban oo ay dhaheen dadyow caan ah.

Lamartine (taariikh-yahankii caanka ahaa) ayaa ina waydiiyay: "Haddii waynida ujeedka ama hadafka, fudaydka nidaamka loo marayo iyo qayrul-caadinimada natiijadu yihiin shuruudaha lagu xulayo cabqari iyo cajiibnimada aadamaha, yaa ku dhiirran kara inuu qof kale oo taariikhdan casriga ah ku jira barbardhiga Muxammad?"

Lamartine wuxuu ku soo gabagabeeyay: "Marka la fiiriyo dhammaan cabbirada lagu qiyaaso Foolaadnimada Aadamaha, waxaynu iswaydiin karnaa, ma jiraan cid isaga (Nebi Muxammad) ka foolaadsan?" (Histoire de la Turquie, Paris 1854, Vol. II, pp. 276-277)

Buugiisa 100-Ka: Isbarbardhiga Shaqsiyada ugu Saameynta Taariikhda Aadamaha, Michael H. Hart wuxuu ku yidhi: "Sababta aan Muxammad ugu doortay inuu hogaamiyo liiska dadka ugu saameynta badan waxaa laga yaabaa inay la yaab ku noqoto dad tiro badan, oo ay qaar kale oo badani ka doodaan, laakiin wuxuu ahaa ninka qudha ee taariikhda lagu hayo ee si yaab leh uga gaaray natiijo la yaab leh dhinacyada diinta iyo hab-maamulka dambe ee caadiga ah."

Harta wuxuu ku soo gebogebeeyay: "Waa isku-darkan dhinacyada saameynta dhinacyada diinta iyo hab-maamulka caadiga ah ee aan lagula tartami karin ta i dareensiisay inuu Muxammad xaq u leeyahay inuu noqdo qofka ugu saameynta badan taariikhda adduunka."




George Bernard Shaw

Buugiisa Islaamka Dhabta ah (The Genuine Islam), Sir George Bernard Shaw wuxu ku qoray: Waxaan rumaysanahay in haddii nin isagoo kale ahi qaban lahaa hoggaanka adduunkan casriga ah wuxuu ku guulaysan lahaa inu dhibaatooyinka adduunka u xallin lahaa qaab dhalin lahayd nabadda iyo farxadda aduunkani aadka ugu baahan yahay.

Shaw wuxuu intaas ku sii daray:
Wuxuu illaa xad ahaa ninkii ugu foolaadsanaa ama fiicnaa dadkii adduunkan cagta soo dhigay. Wuxuu faafiyay diin, aasaasay dawlad, dhisay qaran, dejiyay xeerkii akhlaaqda iyo dhaqanka, bilaabay isbeddelo bulsho iyo siyaasadeed oo tiro badan, dhidibada u taagay bulsho awood badan oo casri ah oo ku dhaqanta oo metelaysa sunnihiisa wuxuna isbeddel ku sameeyay hab fekerka Aadamaha iyo dabeecadiisa ee dhammaan waqtiyada soo socda.

Mahaadma Gaandi wuxuu sharraxay: Waxaan ilaa xad aaminsanahay in aanay seef ahayn waxa Islaamka gaarsiiyey halka uu nolosha adduunka kaga jiro. Waxay ahayd sahalka iyo fudaydka badhax-tiran, iyo is-dhuldhiga Nebiga, ballan oofintiisa xad-dhaafka ah, jacaylka iyo daacadnimada uu hayay asxaabtiisa iyo ummadiisa, geesinimadiisa iyo gabbasho la'aantiisa, kalsoonida sugan ee uu Alle iyo farriinta uu wado uu ku qabay. (Jariiradda Young India)

Wolfgang Goethe (gabyaagii Reer Yurub ee caanka ahaa) wuxuu aaminsanaa: Wuxuu ahaa Nebi ee muu ahayn gabyaa sidaas daraadeed waa in Qur'aanka loo tixgeliyo sharci samaawi ah ee aan loo arkin buug Bini Aadam oo loogu talagalay waxbarasho ama madadaalo.


ENCYCLOPÆD
2
ZEM
ENCYCLOPÆD
I
IMP

Inkolobiidhiyaha Britannica (Vol. 12) waxaa laga soo xigtay:
Qoraalo badan oo laga soo xigtay ilo taariikhi ah ayaa muujinaya inuu ahaa nin daacad ah oo toosan oo kasbaday xushmadda iyo daacadnimada dadka kale ee sidiisa daacadda ah ee toosan... **Muxammad waa Nebiga ugu guusha badnaa Rasuulada iyo shaqsiyaatka diinta ku suntan**.

Thomas Carlyle wuxuu ku sheegay buugiisa Hereos and Hero Worship:

Sida hal nin keligii ugu guulaysan karo inuu qabiilo isdagaalaya iyo Carab Reer Miyi ah ugu abaabuli karay inay noqdaan bulshada ugu awoodda badan ee ugu ilbaxsan adduunka muddo ka yar labaatan sannadood...Beenaha (dacaayadda reer Galbeedka) ee dadka ujeedooyinka gaarka ah lehi dul toomiyeen ninkan (nebi Muxammad) waxay sharaf dhac ku tahay nafahooda oo qudha.

John Esposito (macalin jaamacadeed oo diinta iyo arrimaha caalamiga ah ka dhiga jaamacadaha, Agaasimaha Xarunta Daraasaadka Caalamiga ah ee Kuliyadda Holy Cross, ee Jaamacadda Georgetown University, ee Maraykanka) wuxuu ku tilmaamay buugiisa Islaamka: Dariiqii Toosnaa:

Muxammad wuxuu ahaa mid ka mid ah culimada diinta, nebiyada iyo aasaasayaasha diimaha, ee akhlaaqdooda iyo dhaqankooda shaqsiyadeed ee heerka sare ah ay dadka ku dhaliyeen kalsooni iyo ka go'naan aan la filayn. Guushiisa la yaabka leh ee dhanka soo jiidashada Ummad rumaysa oo taabacda iyo dhisidiisa dowlad-bulsheed maamushay jasiiradda Carabta looma nisbayn karo keliya inuu ahaa nin istaraatijiyadda milatariga xariif ku ah laakiin sidoo kale inuu ahaa nin aad u cajiib ah... Dadka taabacsan



waxay arkeen in Muxammad yahay Nin Diin leh, ammaano leh, taqi ah, daacad ah oo naxariis badan.

Wuxuu ku sii waadixiyay "Muxammad muu ahayn aasaasaha Islaamka; muu bilaabin Diin cusub."

Barafasoor Esposito wuu ku nuuxnuuxsaday xaqiiqadan:
Islaamku isbeddel ayuu keenay; wuxuu ahaa yeedhmo mar kale ah oo dadka loogu wacayo inay si buuxda isugu-dhiibaan (Islaam) Alle iyo fulinta amarka Eebbe oo isagoo isku dhan markii u dambeysey lagu soo dejiyay Muxammad, rasuulkii u dambeeyay, ama lagu soo 'khatimay', Anbiyada. Sidaas darteed, Muxammad, Islaamku umuu ahayn Diin cusub balse toosinta iyo dib u soo celinta caqiiqadada saxda ah...





# Hadalada Quruxda Badan Ee Nabi Muxammad

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaaleyaasha hadalada/ axaadiista Nebiga, si aad u milicsato oo u dhadhansato macaankooda iyo quruxdooda:

- **"Hadalka wanaagsan waa sadaqo."**
- **"Dhoola-caddaynta daacadda ah waa sadaqo."**
- **"Qofka idiinku fiican waa midka idiinku akhlaaqda fiican."**
- **"Inaad shay dhib leh waddada (dariiqa) ka qaaddo waa sadaqo."**
- **"Iimaanka [qaybta] ugu fiican waa samirka iyo dulqaadka."**
- **Markii (Nebiga) la waydiiyay dhinacee baa Islaamka ugu fiican, wuxu ku jawaabay, "Cunto siiya oo salaan dadka aad taqaaniin iyo kuwa aydaan aqoon labadaba."**

Intaas waxaa dheer, Nebi Muxammad (Naxariista iyo nabadgalyada Alle korkiisa ha ahaatee) wuxu yidhi:

- **"Allaha Naxariista Badani (Alle) wuxuu u naxariistaa kuwa naxariista badan. Haddii aad u naxariisato noolaha Adduunka ku nool, Midka Samada Jira ayaa idinkana idiin naxariisan doona."**
- **"Midkiina si sax ah Diinta uma rumayn illaa uu walaalkii la jeclaado waxa uu naftiisa la jecel yahay."**
- **"Kii dherga isagoo deriskiisu gaajo la seexanayo mu'min maaha."**
- **"Qofka xoogga wayni maaha ka legda ama dhulka dhiga qof kale; xaqiiqatan qofka xoogga wayni waa ka xakameeya cadhadiisa."**



- ✓ **"Alle idinkuma qiimeyn doono jirkiina iyo midabyadiina, laakiin Wuxuu daalacdaa qalbiyadiina oo eegaa camaladiina."**
- ✓ **"Ka idiinku fiicani waa midka ugu fiican qoyskiisa, aniga ayaana idiinku fiican oo qoyskaygaan u fiicanahay."**
- ✓ **"Kuwa idiinku fiican waa kuwa dhanka dumarkooda ugu roon."**
- ✓ **"Islaamka waxaa ugu fiican waa in degenaansho iyo dulqaad la yeesho."**
- ✓ **"Dadka waxaa ugu waangsan kuwa ugu waxtarka badan dadka [kale]."**

Kuwani waa tusaaleyaal kooban oo aan ka soo qaadanay oraahaha xikmadda badan, cajiibka ah ee dahabiga ee Nebiga.

Nebi Muxammad sidoo kale wuu ku camal fali jiray wuxuu dadka baro; sidii ula macaamili jiray ee ula dhaqmi jiray dadka kale waxay muujinayaan shaqsiyadiisa iyo qiyamkiisa gaarka ah, naxariistiisa, daacadnimadiisa, kal-jileeciisa, runtiisaa, is-dhuldhigiisa, deeqsinimadiisa, cafiskiisa, samirkiisa, dulqaadkiisa, iyo wanaagyo badan oo kale.

Sheekooyinka iyo caddaynta sifooyinka Nebiga ee la yaabka leh aad bay uga badan yihiin inaynu halkan ku xusno, markaas aynu hal tusaale oo keliya ka qaadanno.

- Ka dib markii gaaladii reer Makka diideen isaga iyo farriintii Islaamka ee uu siday...
- Ka dib markii ay eedeeyeen ee si xun ula dhaqmeen, isku dayeen inay dilaan marar badan...



- Ka dib markii ay jir-dileen ee dileen qaar badan oo dadkii rumeeyay ah iyo dadkii uu jeclaa ...
- Ka dib markii isaga iyo saxaabadiisa la dagaalameen, ka saareen guryahoodii oo qaateen hantidoodii iyo dhulkoodii...

Sidee buu Nebi Muxammad ula dhaqmay dadkii sidaas ula dhaqmay ka dib markii uu soo galay Makkah ee uu ka xoreeyay sanam-caabudnimadii iyo gaalnamadii?

Bilowgii dhacdadan guusha iyo nasriga ay ku gaadheen Nebi Muxammad iyo Muslimiintu, iyagoo farxad, rarayn, iyo guul heerkii ugu sarreeyay maraya maadaama ay ku soo laabteen guryahoodii iyo magaaladii barakaysnayd ee Makkah... Nebi Muxammad wuxuu soo uruuriyay reer Makka, oo ka baqayay inuu dhib u geysan doono ama xitaa dili doono isagoo uga aaraya tacadigoodii iyo dilkii ay horey Muslimiinta ugu geysteen.

Nebi Muxammad wuxuu waydiiyay, "Maxaad filaysaan inaan idinku sameyn doono?" Waxay ku jawaabeen, "Waxaad tahay walaal deeqsi ah oo uu dhalay walaalkayo kale oo sharaf leh."

Dabadeed, Rasuulkii dulqaadka, naxariista, iyo kal-nugaylka badnaa wuu cafiyay. Wuxuu ku dhawaaqay, "Wax dhib ahi idin soo gaari mayso. Waad iska bixi kartaan. Xor baad tihiin." Miyaad marnaba aragtay dhacdo tan oo kale ah? Miyaad horay u maqashay sheekadan oo kale? Ma dareemi kartaa naxariista Rasuulka?



Isagoo sharraxaya dhacdadan aan horay loo arag, Barafasoor John Esposito wuxuu yidhi:

Isagoo ka hortagay aargoosi iyo kala-qaniimaysashada, Nebigu wuxuu taas beddelkeed doortay inuu cafis u fidiyo cadawgiisii hore halkii uu seef kaga aargoosan lahaa. Dhinacooda, reer Makana diintii Islaamka ayay qaateen, waxay ogolaadeen in Muxammad hogaamiyo, waxana lagu daray ummadda (bulshada Muslimiinta).

Taas beddelkeed, ma ka warqabtaa falalka argagaxa leh ee ay qaramada 'awoodda badan' ee kala duwan ka geysteen taariikhda Aadamaha, markay si caddaalad darro ah u weerareen, qabsadeen, una ciqaabeen dadka kale?

Waxaa la yaab leh, markasta oo aynu sii fahano nolosha Nebi Muxammad, waxaynu sii xaqiiqsanaynaa dhaqankiisa iyo akhlaaqdiisa la yaabka leh, iyo inuu dhab ahaantii yahay ***"naxariis Adduunka loo soo diray."*** (21:107)

Nebi Muxammad wuxu yidhi, "Waxaa la ii soo diray inaan dhammeystiro akhlaaqda wanaagsan."

Isagoo xaqiijinaya xaqiiqadan, Alle wuxuu Qur'aankiisa ugu sheegay, ***"Xaqiiqatan, Waxaa kuu sugnaaday dabeecado fiican oo weyn."*** (68:4)

# Ma xiisaynaysaa inaad wax dheeraad ah sii ogaato?

Haddii aad xiisaynayso inaad ogaato macluumaad iyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan Islaamka, fadlan booqo shabakadayada:

**www.discoveritsbeauty.com**

**Taxanaha Lagu Soo Bandhigayo Quruxda Islaamka:**

**1. Kaliya Tallooyinka Aysbaaga**
**2. Diinta Aadam Iyo Xaawo**
**3. ABC-yada Islaamka**
**4. Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha**
**5. Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay**
**6. Waxyigii Ugu Dambeeyay**
**7. Rasuulkii Ugu Dambeeyay**

**Shabakado Islaaml Ah Oo Faa'Ildooyin Badan Leh:**

http://www.allahsquran.com

http://www.quranexplorer.com

http://www.islamhouse.com

http://www.edialogue.org

http://www.islamreligion.com

http://www.newmuslimguide.com

http://www.guidetoislam.com/en/

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay”.

Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:

أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَٰهَ إِلَّا اللهُ وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللهِ

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.






GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM

Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب الرسول الخاتم باللغة الصومالية